Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:3-aad Tr:07.02.2016

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa: 3-aad ee aan caadiga ahayn, sacada furitanka.12:05 gh, sacada xiritan.1:40 gd.

Guntinta: 147 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Soo dhaweynta Guddoomiyaha, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

4.Hadal Jeedinta Madaxweynaha oo ku aadan Golaha Shacabka.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

1.Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan

Waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhiban:C/qaadir Macalin nuur.

2.Gudoomiyaha wuxuu xildhibanada u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha xildhibanada wey ansixiyan ajendaha.

3.Soo dhaweynta Guddoomiyaha:Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka: Mudane: Madaxweyne kalfadhiga 7aad kulankiisa:3aad ee aan caadiga aheyn oo booqasho noogu timid mahan in dood la galiyo, Madaxweyne in aan kula socod siino Golaha Shacabka howlaha horyaala,waa saddex qeybood oo waaweyn,

a) waa shruucdii horay u yaalay dhameystir kooda

b) 5 sharci oo maray Akhrinta 1aad

c) 8 sharci oo maray Akhrita 2aad

d) 3 sharci oo maray Akhrinta 3aad

Mudane:Madaxweyne shuruucdaas ayaa hada nahortaala,waxaa suurtagal ah **kalfadhiga 7aad** oo soo bilowday **26.10.2015**,waxa uu Golaha meel mariyay ilaa **8 Sharci & 3 Qaraar**,shuruucda

Taal qaarkood muhiim ayay u tahay Golaha Shacabka maadama madasha Axsaabta ilaa 10 maalmood ku keenan afkaar tooda,Maxkamada Dastuuriga lagu soo daray sharcigii lagu dhisi laha iyo shuruucyo kale ee aan u baahanahay inta mudada ayna dhaman in la dhameystiro hadba shintiriska oo kooreynaya shuruucda sida ay u kala horeyan, isbuucan waxan ugu tala galnay saddex qeybood oo waaweyn in ay noqdan qeybta koowad,waa howlaha caadiga ahaa ee Golaha in aan ku dhameystirno Qeybta 2aad, waa Dastuurka Baarlamaan ka 9aad ee loo idmaday Guddiga in uu soo bandhigo 15.02.2016 ka bacdi howshisa la galo,waxaan ku dadaaleyna shintiriska la soo sameynayo wuxuu daboolayaa laga bilaabo bisha inta ka harsan oo xirmidoona **kalfadhiga 7aad 25.02.2016,** ama ka hor ilaa iyo Juun 2016 ayaan ku dadaaleyna, waxaan u yeerayna Guddoomiyayaasha golayaasha shacabka ee gobolada in ay halkan hal todobaad nala joogan si ay ugu qeyb galan la tashiga lala tashanayo sida uu Dastuurka uu na farayo Qod.133, islamarkiina aan qaban qaabino si golayaashooda ugu howlgali lahayeen Dib-U-Eegista, Qeybta labaad ee shintiriska ugu tala galnay hadii ay suurta gal noqoto in ay xukuumadda noo keento qorshihii geedi socodka lagu howl gali lahaa Baarlamaankii 10-aad ee doorashooyinka lagu sameyn laha waqti ban ku talagalnay sida ugu dhaqsiyaha badan in ay noo keento Madaxweyne howlahan ina horyaala aadbay u culusyihiin barito guddiga joogtada wuxuu ku soo darayaa shirkeena in golaha lagu ansaxiyo inta ka harsan kalfadhiga 7-aad maalin walba in la shaqeyo aan ka aheyn maalinta khamiista, wixii qabyo ah

la dhameystiro si aan ugu gaarsiino 15.02.2016, in laga gaarsiyo Dastuurka taa ayay marayan howlaha Mudane:Madaxweyne, fasaxii la qaadan jiray laba bilood in aan ka dhignay hal bil oo ah bisha Maarso oo kaliya, xildhibaanada in ay aadan gobolada Baarlamaana dooda si ay ula shiran oo ay ka wada hadlan Dastuurka bisha April na aan usu soo noqono, waxaan dooneyna in shaqadeena ay si xowli ah usocoto, waxaan dooneyna in aan xilkeena gudano Mudane:Madaxweyne waxaa la soo galay waqtigii gunaanadka ahaa ee Golaha Shacabka madashiisa ay soo gaba gaboobeysay si aan u gaarno Baarlamaanka 10-aad, waxaa lagama maarman in aad xildhibaanada siiso fursad, mararka qaar guddiga joogtada aad noo timaado xildhibaanada iyo odoyaasha meesha jooga in wax leys weydiyo ayaan kaa codsaneyna Villa hargeysa ama Villa Soomaaliya wada fariisano oo wax is wareysano, manta waxay 3-da gole ku bad-baadi karaan anagoo wada mideysan oo isku duuban oo daah furnaan lagu wada

shaqeysanayo codsigaas ayay xildhibaanada ii soo gudbiyeen ayagoo I maqlaya in aan kuu soo gudbiyo fursadna siiso, wada hadal, is wareysi, wadatashi, in aan kula yeelano halkan xeer-hoosadka iyo Dastuurka ayaa noo ogoleen.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu ku soo dhaweyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda F.S.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Xasan Sheekh Maxamuud,

Hadal jeedinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: Salaamu caleykum waraxmatulahi wabarakaato,Mudane:Guddoomiye aad iyo aad bad u mahad santahay mudada kooban ee howlaha Golaha Shacabka ku qabsoomay iyo inta hada nahortala,waxan rabaa in an mar labaad u mahad celiyo Golaha Shacabka fursada ay isiiyen in aan hor imaado oo aan anigana warbixin ka siiyo xaalada guud ee dalka in badan anigo og in ay ku mashquulsan yihiin xaalada gaar ah, anigoo kor ka og xaalada guud waxaan raba xildhibaanada sharafta leh ka mahadceliyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya dadaaladii faraha badnaa ee baarlamaanka ee baryihii dhaweyto ee la soo maray ee ku saabsanaa arrimihii sharci dajinta ahaa ee lagu ansixiyay sharciyada muhiimka ahaa ee Baarlamaanka ansixiyay ee Guddoomiyaha Golaha Shacabka halkan ka sheegay, sida lagu wado howsha kuwo kale ee badan lagu ansixinayo iyo go'aanku Goluhu ku gaaray, waqtiga idiin hartay la bixiyo juhdi dheeri ah si howlaha horyaal dowlada Soomaaliya inta badan suurta gal ka ah meel la soo gaarsiiyo Golaha Shacabka Guulo waaweyn ayuu ka soo gaaray arrimaha sharci dajinta, waxyaabihii noo qabsoomay oo suurta galay aad iyo aad bay u farabadan yihiin, aad iyo aadna muhiim ayay u ahayeen, laakiin waxaa noo dhiman in aan sii hiigsano sharci dajino muhiim ah, dhamaan waa wada muhiim, hadii sharciga muhiim aheyn lama sameyn laheyn, laakiin sharciyada sameyntooda marka ay na horyaalan oo ay farabadan yihiin in aan kala xulano ee la yiraahdo keen hor marinaa, keen ku xijinaa, waa shintiriskii aad hada ka hadleysay muhiim waaye, sharciyada aadka u muhiimka ah anagoo howlo badan uu qabsoomi laha iyado caqabad ay jirto uu mujtamaca Soomaaliyeed uu dareemayo oo baahi deg deg loo qabo Rifoomkodii ama hagaajin toodii ama dhameystirkoodii, waxaa ka mid ah sharciga Adeega Garsoorka oo mar kasta ay jiran adeeg garsoor ee ka yimaaden xiligii KMG ahaa, inaan waafajino daruufaha cusub ee dalka jira ee nidaam dadka aan u horseednay oo ah nidaam Garsoor sharci ku saleysan, in aan sameyno nidaam umada u dhaxeya sharcigii waa lasoo sameyay oo lagu dhisayay wasaaradda ay quseysay iyadoo ay raaceyso sharcigaas iyo xukuumada ay soo maren iyo wadiiqadii ay ku habooneyd intii suurta gal aheyd aan qaban karnay waa soo qabaney inta kalana waa qaban doonaa sharcigaas aad iyo aad ayuu muhiim noogu yahay, sharciga arrgagixisada dadka qaarkiis waa laga yaabaa in magacaas uu sax aheyn laakiin muhiim nooma ahan magaca, wixii la rabo haloo bixiyee laakiin nidaam sharci iyo awood sharci haya'daha garsoorka ay heystan iyo haya'daha amniga heystan oo sharciga an dugsano dagaalkas ku jirin iyo cadowga aad ubalaaran in aan la dagaalameyno si sharciyaysan waa loo baahan yahay wax

badan oo arrimahena amnigu iyo dagaalka noocas ah wey ku jiraan waxaa sabab u ah in qaanuunkii lagula dagaalamayay dambiila yaashaas noocas ah iyo nidaamkii xeerinayay iyo wixii awood siinayay iyo wixii ogolanayay intaba wey naga dhimanyihiin, waxaan rabaa Golaha Shacabka sharafta leh in aan u sheego dad badan oo qaali ah ayay arrgagixisada naga dishay mudadii aan soo dhaafney shacbi badan oo dambi laheyn dhibaato ayaa gaartay, laakiin hay'adaha amniga waxey sameyan dadaal badan aan caadi aheyn iyo duruufo aan caadi aheyn, laakiin maqnan shaha sharcigan wax badan ayuu la maqan yahay, kaalmo caalami ah in aan helno ayuu la maqan yahay, dagaalka noocan ah waa dagaal qaas ah aalado gaar ah iyo tabo gaar ah ayaa loo adeegsado ayuu leeyahay, waxaa caqabad nagu noqotay sharcigaas ama qaanuunka awgiis in nalagu siin wayay kaalmada,qalab badan oo aan dalbanay in nalagu siin waayay, waxaa nalaleeyahay sharciga ayaa idiinka maqan, Baarlamaanka waxaan idiinka codsanaya in sharcigaas la meel mariyo, sharciga hala akhriyo, wixii danta guud caqabad ku ah, wixii aan ku habooneyn qaanuunka kale ee xad gudub ku ah heybada,sharafta, karaamada ummada, dowladnimada, midnaba halaga bixiyo duruufaheena manta waa laga reebaa, waxaa laleeyahay kan maahan kii manta, meeshii wax ka maqan ha lagu kor dhiyo, wixii ku sa'id ah hadii ay jiraan halaga reebo, laakiin sharcigaas Garsoorka haya'daheena amniga gacmahu ugu xiran yihiin, meelo badan oo dagaal ku gali laheen gacmaha ayay ka xiran yihiin, waa qof la yiri hal gacan halaga xiro oo ha ku dagaalamo hal gacan ayay la mid yihiin, muhiimada uu sharciga leeyahay waa midaas qaanuunka manta ka jiraa ninka arrgagixisada dilaayo waxaan ku qaadna qaanuunka ninka toorey ku dhuftay qaanuunka loo cuskadey ayaa iyadana loo cuskanayaa intan ka aheyn shareecada islaamka, Aayadaha Qu'raanka kariimka loogu dabaqo meel maxkamad xukunkaas isaga dhowyihiin waa halkaas, sharciga arrgagixisada hoos baan ka xariiqayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya muhiimad sare ayuu u leeyahay, shuruucda oo dhan waa muhiim.

Waxaa soo haray sharciga siyaasiyiinta aad iyo aad bu muhiim u yahay, wuxuu daafacayaa uu ilaalinayaa sharciga isgaar siinta, wuxuu ku wajahan yahay xuquuqda wadanka ku leeyahay, wuxuu ka ilaalinayaa in dibada loogu soo duulo, wuxuu ka ilaalinayaa hay'ada dowlada iyo saraakiisha in ay sidii ay doonaan ula dhaqmaan dhinac kasto waa jibaadka iyo xuquuqda ayuu qeexayaa, sidoo kale sharci kasto ee la idiin keeno maadama wakiilada shacabka ad tihiin,wixii shacabka ka maqan waa in aad ku dartaan, sharcigaan isagana hoosta ayaan ka xariiqaya Golaha Shacabkana isagana il gaar ah haku fiiriyan inta la dadajin karo ha la dadajiyo mudo dheer ayuu nala yaala sharcigaan, sharciga lagu dhisilahaa Maxkamada Dastuuriga waa muhiim dalka iyo dadka ayay muhiim u tahay is qab qabsi badan qof walba Dastuurka sida uu u sharxdo waxyaa bahaas ayaan kaga bed baadeynaa siyaasada dalka ma dhismi karto mana hagaagi karto hadii ayna jirin cid awood uleh in ay tarjunto Dastuurka ee uu yiraahdo san maahan ee waa sidan ee kama danbeys uu yahay Maxkamada go'aankeeda, Maxkamada Dastuuriga waa waxyaabaha aadka muhiimka noogu ah.

Dhismaha Guddiga madaxa banaan ee Xuquuqul Insaanka labo arrimood ee muhiim ah waa weyn ayuu lee yahay guddigan, guddi ahantiisa iyo jiritaankiisa muhiim u yahay cid madax-banaan ee xuquuqda dadka muwaadiniinta Soomaalida iyo bani'adamka kale ee soomaali jooga ee Soomaaliya aan aheyn xuquuqdooda bani'aadanimo cid ilaalisa ee ka madax banan waa loo baahan yahay muhiimada uu leeyahay guddigas waa taas, in uu qeyb ka yahay dhismaha adeega Garsoorka oo afar xubnood xafiiska joogan ee adeega Garsoorka ka mid noqonayo uu ka mid yahay Guddoomiyihiisa, marka ilaa guddiga la dhiso oo Staragjarkiisa dhismayo guddigan Adeega Garsoorka waxbaa ka dhiman laakiin waa sii shaqeyn karaa, labadaas muhiimadood ayuu leeyahay isaga in lagu daro ayaan hor tabinta Guddiga Adeega Garsoorka afar qof ee holowoodka fadhiya in uu muhiimada uu yahay,Guddiga adeega garsoorka iyo xeer ilaaliyah guud in dood ka jirto,waa la kala cadeyn karaa laakiin in ay caqabad noqoto labadaas qeybood hadii mad madow ka jiro ma socon karo maahan Guddiga Adeega Garsoorka, sideedaba hadii madow uu jiro anagaa xalineyna, dadka xafiiska jooga waxa ka mid noqonayaan guddiga,Baarlamaanka ayaa ansixinaya dadkaas xafiisyada jooga 5qof ka mid ah wiil ama gabar ayaa ka mid noqonaya 9 qof ee guddiga,hadii ay tahay mid ka qeyb galeyso xeer-ilaaliyaha waa joogaa, hadii uu garyaqaanku uu yahay waa jooga Garyaqaanka kala saaridooda iyo Guddiga Garsoorka yaan isaga keen xirmin aan kala hagaajino waan leenahay awood aan ku kala habeysano, arrintan waxaan rabaa in aan mar labaad hoosta ka xariiqo, taas waxaan u soo qaatay matalaad sharciyada dhamaan waa wada muhiim, aad iyo aad baan idiinku bogaadinaya waan idiin mahad celinayaa, shuruucda noo hartay inta aan lagaarin waqtiga la soo gaba gabeynayo aan dhameystirno, hadii la arko in aan subin Karin si kale aan u dhigno, wixii aan meel marin karno aan meel marino, hadii aan intaas ugu baxo arrimaha Baarlamaanka.

Hadii aan ka hadlo arrimaha siyaasadda Soomaaliya dal caadi ah maahan,dalalka aduunka ku yaala waa dal xeerarka iyo nidaamka ay u dhisan yihiin, hadii aanahay Soomaaliya waa dal hada dhismayo,waxey ku dhismayan nidaam cusub oo kii hore ka duwan, dalkan awal nidaamkii dowladnimo uu ku jiray 30 sano wuxuu ahaa Dimoqraadi, hada waxaan dooranay nidaamka Federaalka ee baahsan, shuruucdisi iyo ahmiyaadkii uu u baahnaa wixi oo dhan in aan dejino ayuu u baahan yahay, waa dal cusub oo hada la abuurayo qawaaniintii horay u jirtay hada in badan ay noo shaqeyan oo ay yihiin qawaanin sax ah, mustaqbalka nidaamka hada aan dooranay wuxuu na faraya qawaaniin gaar ah oo saxda ah aan keeno si wixii aan dooranay oo niri dalka Federaal aan ka dhigno waxa uu u baahan yahay qaab siyaasadeysan,waxaan kalo doraney in aan Dimoqraadi ahano xukunka baahsanado talada ay noqoto nidaamkii adeega la nimaadno inta aan ku jirno wadadaas ayaan adeegeynaa shuruucdii iyo nidaamkii anaga meel iskama fafadhineyno ma nihin dad dhintay umad jirtaa nahay caalamka waa ku jirnaa mushkulada naheysata waa dowlad nimada iyo siyaasada qaran ahaan iyo qowmiyadaha dad jiraa nahay, aduunkaan wax la wadaagnaa oo aduunka waa u baahanahay ayagana waa noo baahan yihiin, cahdi wali lama hayo laakiin qaanuunkii wali

nooma habeysno meeshaswali isma fahmin meeshaas wali waxba ku jira in aan aduunka u fadhino maahan wali waa soconeyna inaan wada tashano ayaan u soconaa maxan ku soconaa in aan isku dulqaadano ayaan u soconaa oo aan ognahay wax yaabaha naga maqan iyo baahida dalkeena saran ee dadkeena uu qabo ee ka jawaabno awgeed ayaan ku soconaynaa, wax yaabo ugu fiican mar walbo ee aan anaga gacanteena marwalba ku jirin in aan ku hamiyin oo aan ku dheeran laakin aan wada tashano aan dhahno waxan waa naga wada maqan yihiin haye sidan u dhaqanaa inta aan ka heleyno tuulkii ama qawaaniintii saxda aheyd siden u dhaqanaa mudadaas, waxan ku dhaqmeynaa sidaas iyo sidaas, waxaan ubaahanahay kalsooni dheeri ah usu dul qaadasho, carada, warka xanafta leh, faro isku fiiq fiiqa, waxba naguma soo kordhinayan, cabsida waa sidoo kale, hadan iraahdo 10 xildhibaan ayaa halkan ku shir shirayay tolow maxay soo wadaan oo aan cabsi meel la fariisto, oo adinka aad tiraahdan oo odaygii Madaxweynaha halkaas ayuu marayay tolow muxuu soo wadaa, halkaas ayaan joogeynaa, waa in kalsooni aan isku qabnaa, dowlad nimo ayaa naga dhexeyso, masu'liyad ayaa naga dhexeyso hay'adii wax kala tabanaya in aan raadino jawi wada ogolaansho in aan wax isla ogolaano intii suurta gal ah, waxaa ugu badan ee suurta gal ah in ay wax isla ogolaadan hadii wax leysla ogolan wayo cidii wax ka tanaasushay awoodihii ayadaa ku magacawneed dadka u aamin sanayen sida, Madaxtooyada,xukuumada,Baarlamaanka ee talada soo qaaday ee la yiri talada in tiisa badan talada ha gaarto yaa ku qasban masu'liyadda ha dhow lama wada wadaago hadii dhibaato timaado cida ay ku dhaceysa qaanuun hebel baa looga baahna waana la dhaqaajin waa yay Dastuurka loo baahna nooma sameysna masu'liyadiisa dadka kala duwan ayay saran tahay, laakiin ayagana maxey sameynayan inay dadka la kaashadan Dastuurka waa sidan daraafki waa kan Qodobkina waa kan ee halaga hadlo dadka ha loo sheego idaacadaha ha laga siidayo, waa kii dadka lagu dhaqi lahaa dadka halka jooga ha maqlan ha ogaadeen hadii ay wax ka qaban ha sheegen hadii ay wax ku darayaan haku daraan, hadii qolo xaga aado kuwo kalana xaga tagan marka ugu dambeysa ay Baarlamaanka gacanta u taaga uu yiraahdo aan u codeyno,waxaa ugu dambeyntii u dhigantaa Baarlamaanka Federaalka Soomaliya oo badankiisa shacabka soomaaliyeed matala oo sharci ku aqbalay.

Saldhiga Sharciyadeed ee ay leedahay umada Soomaaliyeed waa Baarlamaanka Federaalka .S. mar walba arrimahaas Baarlamaanka aya ku shaqa leh, dowlada Federaalka waxay habeysay wada tashiga in la qaabeyo oo la nidaamiyo, waxaan go'aan ku gaarnay dowlad ahaan Xukuumada,Baarlamaanka, Madaxtooyada wada tashi aan noqonin iska dheh,waxaa la abuuray dowlad wada tashi laga soo bilaabey, madasha hogaamiyayaasha dowlada dhexe iyo dowlad goboleedyada isku yimaadan arrimahan siyaasadda qaarkood si aan loo dhihin, sida ma ogin, nagalamatashan, wax aan nalaga tashan side naloogu xukumaa, side loogu go'aaminaya, si ay nan u dhicin, wax la qarsanayo iyo cid wax gaar ah samey saneyso ma jirto waa in leysu yimaada hala wada tashadee, madasha wada tashiga Qaranka ee la soo gaba gabeyay ayan hore waxay aheyd ayamahan dhaweyt oo dadka oo dhan ay ka soo qeyb galeen

sida qeybaha kala duwan, ee dowlada, Baarlamaanka, xukuumadda, madaxtooyadda, bulshada rayidka ah, Maamul Goboleedyadda xukuumadooda iyo Baarlamaankooda ay ku jireen, dadka Soomaaliyeed suurta gal maahan in hal meel ay soo wada fariistan, laakiin dadkii dadka matalayay hadii dowlada dhexe tahay iyo dowlad goboleed yadaba in leysku keeno, madashaas waxaa maamulayay oo gacanta ku hayay oo ka shaqeynayay in ka badan boqol qof si laba qofba talo meel u wada galin iyo laba qofba luuq uwada fariisan, si aan loo oran labaa meel ku soo shoortay, waxaa shaqeynayay boqol qof oo usugu jira baarlamaan, xukuumad, dowlad goboleed yada iyo bulshada rayidka ayaa maamuleysay madashaas wada tashiga Qaranka, iyo dadka fariinta gaarsiinayay, hadii ayna jirin qawaaniintii nahageysay,marka xiga ee aan doorbidnay, waxey noqotay seen yeelnaa, meeshee laga fursan waayay an yelnee.

Anaga siyaasadeena caadi maahan cid aan hada u sheegano ma jirto, Ameeriko siyaasadeeda iyadaa xalisata, wadamada kale siyaasadooda wey xalistan, wadan keena aan xalino waan sameyn karnaa, wiilka dhalin yaradda ee ciidanka ah aan xushmeyno, waxaan u dirnay amni ee taagan jidka laguna tooganayo, ee dhimanayo, ee la qarxinayo ee gurigiisa lagu tooganayo ee isaga u bareeray ee masu'liyadaas qaaday in aan lagu sameyn af lagaado, in la caayin, in aan la eedeyn, ee aan dhiira galino oo an dhahno waa fiican tahay, hala yiraahdo, waa in la yiraahda waxan ayaa kaa qaldan iska hagaaji, maahan in la yiraahdo Baarlamaanka iyo xukuumada ayaad la dirirsan tihiin, hadii meel walbo ka soo xiranto wuxu noqonayaa qof curyaan ah waxba ma qabanayo wuxuu ilaa shanaya oo kaliya mushaarkiisa, waxaan codsanaya Baarlamanka iyo hay'adaha amniga dadka xiran oo laga daba galayo in la joojiyo, madaxda dowlada hadaan nahay, wasiir, xildhibaan, madaxtooyo, nabadoon, dadka hadii ay meel yimaadan la xushmeynayo, Al-shabaab wax badan ayaa nooga halaabayo, iskiriinka la dhexmarayo anaga aan iska bilowno, amniga anaga aan ugu horeyno oo suunka ka bilowno, oo ku xijino telfonka, oo ku xijino kabaha, hadii anaga dhinac marno qofkale dhinac ayuu maraa, anaga waa in aan miitaal noqonaa, oo mujtamaca nagu deysado, waxan idiinka codsanaya Baarlamaanow dad lagu deysado noqda, markad Airporka tagto dhamaan iska dhig waxad sidatid, dadka kale sidey noogu daydan, wax kasto oo Airpor leeyahay waan leenahay, waa in la helaa waajibaad sharciyaysan oo kala dambeyn leh, xaajadeena dhamaan waxay ku soo urureysaa siyaasadda aan toosino, hadaan isla garano wixii manta suurta galay oon ku heshiino aan qaadano oo horey u socono, waxaas oo dhan waa noo imaanayan dhaqaale waa heleynaa, amaanka waa noo sugmaa, markale waxaan hambalyo u soo jeedinayaa Baarlamaanka oo dhaqanka Soomaaliyeed ah dowlad dhisida waa dhaqan, dhanka kale wuxuu ku yimaadaa in la arko ama ku dayasho dhaqankeena, aan ka hor tagno kii carqalad galinaya dalkeena aan niraahno ka jog, hadii nin ciidan ah loola dhaqmaya six un, oo aad tiraahdo askariga si wanaagsan ula dhaqan askariga waxaa galaya farxad waajibkiisana si wanaagsan ayuu u gudanayaa.

Baarlamaanka waa idiin hambalyeynaya, waqtiga aan kulmeyno Guddoonka ayaa cayimaya.

Kalfadhiga 7-aad kulankiisa aan caadiga aheyn ee 3aad, uu shir Guddoominayay Guddoomiy aha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:40 gd.